

Maadaama ay sii badanayso faafitaanka COVID-19 (Koroona fayras) ee Koloraado, Waaxda Garsoorka waxay si joogto ah uga shaqaynaysaa in ay isu dheelitirto tixgalinta caafimaadka dadwaynaha iyo muhiimadda ah joogtaynta maamul taabagal cadaaladeed oo ay helaan muwaadininita iyo bulshooyinka gobalkeena ku dhaqan.

Waax kastoo garsoor waxay websaydkeeda soo galinaysaa waraaqo ay ku qoranyihiin warbixin muhiim u ah garsoorayaasha, xeerbeegtida, iyo dadka tijaabada lagu sii daayay kuwaas oo ku saabsan nidaamka la rabo in maxkamadda looga soo hor muuqdo.

Warbixintan waxaa looga jawaabayaa faafitaanka COVID-19 (Koroona fayras), waxayna wax ka tilmaamayaan go'aanada iyo habraacyada ay ku shaqaynayso maxkamad kasta inta uu jiro faafitaanka cudurka. Warbixinada waxaa looga heli dagmada iyo maxkamadaha iyoadoo loo sii marayo bogooda websayka.

Dhacdadan caafimaadka dadwaynaha qusaysa si xowli ah ayay isu badalaysaa. Waxaan cusboonaysiin doonaa tilmaamaha ku saabsan maxkamad kasta marka ay diyaar noqdaan. Fadlan wixii warbixin guud ah ee la xiriirta faafitaanka COVID-19 ee Koloraado ka fiiri websaydka Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha iyo Deegaanka ee Koloraado ama Xarumaha Xakamaynta Cudurka.

Fadlan ku dhufo linkiyada hoose si aad u hesho warbixinta maxkamadda ee waaxdaada kuu gaarka ah. Mararka qaarkood, waxaad u baahan kartaa in aad maxkamadda toos ula xiriirto si aad u hesho warbixin dheeri ah.